[Return location]
[Return address 1]
[Return address 2]
[City state ZIP]

Oregon Department of Human Services
OFFICE OF DEVELOPMENTAL DISABILITIES SERVICES

**Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon**
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

MM/DD/YYYY

Client name
Client address
City, state, ZIP

Waalidka ama mas'uulka qaaliga ah FIRST_NAME,

Barnaamijka cusub ee Baahiyaha Aan Caadiga Ahayn ee Carruurta (CEN) wuxuu u adeegaa carruurta yar yar ee qabta baahiyaha caafimaad ama hab-dhaqan oo aad u sarreeya. Ilmahaaga si nasiib ah ayaa loogu soo xushay mid ka mid ah boosaskii u horreeyay ee barnaamijka. **Fadlan akhri warqadan si aad u ogaato waxyaabo ku saabsan tallaabooyinkaaga xiga.**

1. La hadal isku duwaha adeegyada ee ilmahaaga dhawaan. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka Xafiiska (ODDS) ayaa u sheegay iyaga in ilmahaaga la xushay. Haddii aad daneynayso in aad ku soo biirto barnaamijka, waxay kugu hagi doonaan tallaabooyinka xiga. Haddii aadan daneynayn, fadlan u sheeg iyaga si booskani loo siin karo ilmo kale. Haddii ilmahaagu ku jiro liiska sugitaanka ee Adeegyada Carruurta ee Guriga Dhexdiisa ee Ballaaran (CIIS), shaqaalahooda ayaa kula soo xiriiri doona si ay kuu caawiyaan.
2. **Luulyo 19:** Waan in aad go'aansato haddii la isku diiwaan gelinayo barnaamijka marka la gaaro taariikhdan. Haddii aad ugu soo sheegi waydo isku duwaha adeegyada ee ilmahaaga marka la gaaro taariikhdan, ilmahaagu waxaa loo wareejin doonaa dhammaadka liiska sugitaanka.
3. Barnaamijka, ilmahaagu wuxuu haysan lahaa ilaa 20 saacadood toddobaadkii oo ah daryeelka waalidka ee lacagta la qaato. Haddii ilmuhu leeyahay wax ka badan hal waalid oo daryeel bixiye ah, way kala qaybin karaan saacadaha u dhexeeya daryeel bixiyaasha. Si loo bixiyo daryeelka lacagta la qaato, waalidiinta iyo mas'uuliyiintu waa in ay u qalmaan in ay ka dhex shaqeeyaan Maraykanka.
4. Inta aad u shaqeynayso daryeel bixiyaha ilmahaaga oo lacag qaata ahaan, waxaad yeelan lahayd mas'uuliyado sharci oo ka duwan kan aad leedahay ee waalid ama mas'uul ahaan. Su'aalaha inta badan la isweydiiyo ee ku yaala dhammaadka warqadani waxay sharraxayaan sida doorkaagu isku beddeli doono xirfadlaha taageerada tooska ah (DSP) oo lacag qaata ahaan.
5. Inta u dhaxaysa **Maajo 15 ilaa Luulyo 19**, isku duwaha adeegyada ee ilmahaagu waa in uu ODDS u sheegaa haddii aad rabto in aad isku diiwaan geliso barnaamijka ama aad doorato in aadan ka qayb qaadan.

a. ODDS ayaa ka dib xaqiijin doonta in ilmahaagu:
    - Isku diiwaan geliyay Medicaid, **iyo in uu**
    - Buuxinayo mid ka mid ah heerarka daryeel ee barnaamijka CEN, **oo**
    - La qiimeeyay in uu leeyahay baahiyaha caafimaad ama hab-dhaqan oo sarreeya taasi oo ah Qiimeyntiisii Baahiyaha ee Oregon (ONA). Waa in uu ku jiraa kooxda adeega 5m ama 5b.

b. Ka dib marka ODDS xaqiijiso u qalmida ilmahaaga, waa in aad martaa nidaamka shaqaaleysiinta ee ka jira hay'ada daryeelka bixisa si aad u noqoto xirfadlaha taageerada tooska ah (DSP). Tani waxaa ka mid ah tababarka iyo baaritaanka taariikh dembiyeedka. Waa in aad sidoo kale cusbooneysiisaa Qorshaha Taageerada Shaksi (ISP) ee ilmahaaga. **Luulyo 1** waqtiga ugu horreeya ee aad bilaabi karto adiga oo ugu shaqeynaya daryeel bixiyaha ilmahaaga oo lacag qaata ahaan.

c. Hay'adaada daryeelka bixisa iyo isku duwaha adeegyada ee ilmahaaga ayaa kugu hagi doona shaqaaleysiinta, tababarka iyo cusbooneysiinta ISP.

6. **Sibtambar 15:** Waa in lagu shaqaaleysiiyaa marka la gaaro taariikhdan. Haddii nidaamka shaqaaleysiinta dib loo dhigo, hay'adaada daryeelka bixisa ayaa codsan karta waqti dheeraad ah.

## Ilaha

Haddii aad hayso su'aalo, fadlan la xiriir isku duwaha adeegyada ee ilmahaaga. Waxaad sidoo kale email u diri kartaa cenprogram@odhs.oregon.gov. Waxaad sidoo kale waxyaabo dheeraad ah ogaan kartaa oo ilo ka heli kartaa bogga bogga internet-ka ee barnaamijka CEN:
https://www.oregon.gov/odhs/idd/Pages/sb-91-implementation.aspx.

Waxaad sidoo kale iskaan gareyn kartaa code-ka ku jira qalabkaaga gacanta si aad u aado bogga internet-ka.

Kooxda taageerada ilmahaaga iyo shaqaalaha ODDS ayaa halkan u jooga in ay kugu taageeraan nidaamkani.

Si Daacadnimo leh,



Dana Hittle
Agaasimaha Ku meel gaarka ah
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

## Su’aalaha inta badan la isweydiiyo

### Waa maxay doorka ilmahayga ee doorashada waalid si uu u noqdo daryeel bixiyahiisa lacagta qaata iyo si uu uga qayb qaato barnaamijka CEN?

Waalid ama mas’uul ahaan, adiga ayaa dooranaya daryeel bixiyaasha ilmahaaga yar oo lacag qaata. Isku duwayaasha adeegyadu waa in ay ilmahaaga kala hadlaan dhammaan fursadaha kala doorasho ee daryeelka. Haddii ilmahaagu uusan rabin in aad u shaqeyso daryeel bixiyahiisa ahaan, isku duwahaaga adeegyada ayaa kaala shaqeyn kara adiga iyo ilmahaaga in la xalliyo wixii arrimo ah ee jra.

### Waa maxay wakiilka la qoondeeyay?

Wakiilka la qoondeeyay wuxuu kala hagaa Qorshaha Taageerada Shaksi (ISP) ee qofka marka qofku uusan awoodin. Carruurta yar yar, waalidiinta iyo mas’uuliyiinta ayaa sida caadiga buuxiyo doorkani. Wakiilkani ma noqon karo daryeel bixiyaha lacagta qaata ee ilmahooda yar iyada oo sababtu tahay dano is khilaafsan. Qof kale waa in uu buuxiyaa doorkani marka waalid ama mas’uul dhalay ilmaha yar ay yihiin daryeel bixiyahiisa lacagta qaata oo uusan jirin waalid ama mas’uul kale oo buuxiya iyada.

### Maxaan filan karaa isku duwaha adeegyadayda?

Isku duwaha adeegyada ee ilmahaaga wuxuu kaala shaqeyn doonaa in la cusbooneysiiyo Qorshaha Taageerada Shaksi (ISP) ee ilmahaaga. Cusbooneysiintani waa in la sameeyaa ka hor inta aan lacag lagugu siin adiga oo ah daryeel bixiyaha ilmahaaga ahaan.

Carruurta waxaa la qori karaa oo kaliya hal wax iska dhaafid markiiba. Marka la isku soo xusho barnaamijka CEN, isku duwaha adeegyada ee ilmahaaga ayaa fursada kala doorashada kala hadli doonaa adiga iyo ilmahaaga. Waxay ka caawin doonaan in aad fahamto sida barnaamijka CEN uu uga duwan yahay adeegyada ilmahaaga ee hadda jira. Waxaad wax ka ogaan doontaa fursadaha kala doorasho ee maamulka kiiskaaga iyo shuruudaha sida la xiriirka maamulka kiiska bishii.

### Sidee baan iskugu diiwaan geliyaa xirfadlaha taageerada tooska ah (DSP) ahaan oo leh hay’ad daryeel bixisa?

Isku duwaha adeegyada ayaa kaa caawin doona in aad hesho hay’ad daryeel bixisa. Hay’adaha qaarkood ayay dhici kartaa in ay hore u sheegeen in ay rabaan in ay shaqaaleysiiyaan waalidiin daryeel bixiye ah. Kuwo kale ay dhici kartaa in ay noqdaan kuwa la helo karo. Waxaad liiska daryeel bixiyayaasha ka heli kartaa website-ka CEN ee hore ugu qoran warqadani.

**Maxay yihiin adeegyada uu waalid bixin karo DSP ahaan ee loogu talagalay hay'ad daryeel bixisa?**

Hay'ad daryeelka bixisaa waxaa dhici karta in ay dirto biilka loogu tagalay adeegyada daryeel bixiyaha. Adeegyada daryeel bixiyuhu waxaa ka mid ah caawimaad gacanta wax laga qabanayo, kormeerid ama wax tilmaamid loogu talagalay hawlaha nolol maalmeedka (ADL), hawlaha nolol maalmeedka muhiimka ah (IADL) iyo hawlaha la xiriira caafimaadka. ADL-yadu waa hawlaha qofku is daryeelayo sida:

- Wax cunista
- Isticmaalka musqusha
- Nadiifinta
- Lebisashada, iyo
- Qubeyska.

Hawlaha qaarkood ma aha kuwo biilkooda la isku soo dalici karo maxaa yeelay waa in ay iyagu horeba u bixinayaan waalidka, nidaamka dugsigu ama nidaam caafimaad. Tusaalaha hawsha aan biilkeeda la isku soo dalaci karin waa gaadiidka lagu aadayo lagaga soo noqonayo dugsiga ama balamaha caafimaadka.

Waalid daryeel bixiya ahaan, waxaad raaci doontaa siyaasadaha hay'adaada daryeelka bixisa. Waxay kuu tilmaami doonaan in aad bixiso taageerooyinka ka tirsan qorshaha taageerada ilmahaaga iyo heshiiska adeega. Haddii xaalad ka baxsan mas'uuliyadaha daryeel bixiyahaagu dhacdo inta aad bixinayso daryeel lacag la qaato, raac siyaasadaha iyo nidaamyada hay'adaada.

**Maxay ka dhigan tahay in la buuxiyo mid ka mid ah ah heerarka daryeel ee ku jira barnaamijka CEN?**

Tani waxay ka dhigan barnaamijka CEN la'aantiis, in ilmahaagu awoodi doono in uu helo heerarka daryeel ee lagu bixiyo isbitaalka, xarunta dadka lagu xanaaneeyo ama xarunta daryeelka oo loogu tala galay dadka qaba naafanimada maskaxda.

**Waa maxay kala duwanaanshaha u dhexeeya doorka waalid iyo daryeel bixiye lacag qaata?**

Waxaa jira kala duwanaansho weyn oo la taaban karo, sida lagu muujiyay shaxanka hoose. Hal mid oo muhiim ah oo ay ku kala duwan yihiin waa in daryeel bixiyayaasha lacagta qaata ay yihiin soo sheegayaal ay ku waajibto in ay soo sheegaan xadgudubka dhaca waqtiyada oo dhan. Soo sheegaha ay ku waajibto ahaan, waa in aad xadgudubta la tuhunsan yahay ama dacayaada la geystay u soo sheegtaa mas’uuliyiinta.

Wac khadka xadgudubka 855-503-SAFE (7233) si aad u sameyso warbixin. Khadku wuxuu furan tahay 24 saacadood maalintii, 365 maalmood sanadkii.

| Doorka inta loo shaqeynayo xirfadlaha taageerada tooska ah (DSP) ahaan | Doorka waalid ahaan ee ka baxsan saacadaha DSP |
|---|---|
| Soo sheegaha ay ku waajibto in uu soo sheego xadgudubka 24/7 | Wali ah soo sheegaha ay ku waajibto in uu soo sheego xadgudubka 24/7 |
| Kaliya adeegyada ADL/IADL u bixi sida ay u tilmaantay hay’ada daryeelka bixisa ee lagu tilmaamay ISP iyo/ama heshiiska adeega | Ma jiraan wax xaddidaado ah oo ku saabsan daryeelka |
| Ma uu bixin karo wax daryeel ah oo loogu talagalay carruurta kale ee da’doodu ka yar yahay 10 jir inta uu adeegyada ADL/IADL siinayo ilmahaaga ka tirsan barnaamijka CEN | Ma jiraan wax xaddidaado ah oo ku saabsan daryeelka |
| Ma uu bixin karo daryeelka loogu talagalay dadka waaweyn oo nugul inta uu adeegyada ADL/IADL siinayo ilmahaaga ka tirsan barnaamijka CEN | Ma jiraan wax xaddidaado ah oo ku saabsan daryeelka |
| Ma uu qaban karo waajibaadyada guriga ee aan si toos ah ugu faa’iideynayn ilmahaaga ka tirsan barnaamijka CEN | Ma jiraan wax xaddidaado ah oo ku saabsan waajibaadyada guriga |

| Doorka inta loo shaqeynayo xirfadlaha taageerada tooska ah (DSP) ahaan | Doorka waalid ahaan ee ka baxsan saacadaha DSP |
|---|---|
| Taageerooyinka hab-dhaqanka waxaa loo oggol yahay kaliya sida lagu oggolaaday ISP | Sida wax looga qabto hab-dhaqanka ma xaddidayo ISP |
| Lama oggola in la shaqeeyo iyada oo la joogo meel fog ama shaqada qofku iskii u shaqeysto | Ma jiraan wax xaddidaado ah oo ku saabsan in la shaqeeyo iyada oo la joogo meel fog ama shaqada qofku iskii u shaqeysto |
| Daryeel bixiye lacag qaata ma hagi karo ISP iyada oo sababtu tahay dano is khilaafsan | Daryeel bixiye lacag qaata ma hagi karo ISP-ga ilmahiisa waqti kasta oo la joogo. Tani waa dano is khilaafsan. Wakiilka la qoondeeyay oo aan ahayn daryeel bixiye lacag qaadanaya waa in uu oggolaadaa, saxiixaa oo la socdaa adeegyada ISP haddii uusan jirin waalid kale oo loo heli karo doorkani |

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso oo lacag la'aan ah. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811 ama email u dir dd.directorsoffice@odhsoha.oregon.gov. Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan.